


Kulanka daryeelka caafimaadka ee la adeegsado aalada dijitaalka iyo Kulankeyga daryeelka caafimaadka (Mitt vårdmöte)

Digitala vårdmöten med Mitt vårdmöte



Waxaa aad hadda wixii ka danbeeya kula kulmi kartaa hawl wadeenadayada ama shaqaalahayaga aaladaha la isku arko, adiga oo adeegsanaya App-ka lagu magacaabo "Mitt vårdmöte"/"Daryeelkega caafimaadka".

Adiga iyo qofka shaqaalaha ee aad la kulmi doonta ayaa si wadjir ah u qabsan doona balan aad ku yeelataan kulan la adeegsan doon aaladaha la isku arko.



Kulankada la adeegsanyo aalada la iska arko waxaa uu badelkiisa gali karaa booqashooyinka qaarkood ee lagu yimaado rugaha daryeelka caafimaadka.

Waxaa ay tani u hawl fududeyn kartaa bukaanka socodka iyo qaraabda labadaba.

Sidoo kale waa mid u fiican cimilada.



Si aas uga qayb qaadato kulanka waxaa aad isticmaali kartraa kombiyuuter, telefoonka gacanta (mobil) ama Ipad. Aalada aad isticmaaleyso waa in ay lahaato kaamaro iyo internet. Waxaa loo baahanyahay in aad soo dajisato App-ka lagu magacaabo "Mitt Vårdmöte-VGR" Waxaa aad App-kaas ku jiraa oo aad kal heli kartaa App Store ama Google play haddii aad rabto in aad isticmaasho telefoonka gacanta (mobil) waxaa loo baahanyahay. Si aad u gali karto waxaa aad u baahantahay in aad isticmaasho Mobil BankID.



Fadlan xasuusnow in qolka aad ku sugnaato qol aan buuq laheyn isla markaana aysan cid kale ku maqli karin. Waxaa loo baahanayahay in aad haysato internet.

Waxaa kale oo haboon in aad isticmaasho samiicadaha la gashado dhagaha oo wata makarafoon si aan si fiican iskugu maqli karno waxa aan ka hadleyno.



Warqada wicitaanka waxaa laguugu soo diri doonaa e-meyl ahaan ama fariin qoraal ah ayaa telefoonkaaga laguugu soo diri doonaa.

Fadlan fur App-ka "Mitt Vårdmöte-VGR" isla markaana dooro qaybta ku qaabilsan.

Marka ugu horeysa ee App-ka waxaa aad u baahantahay in aad aqbasho shuruudaha. Waxaa kale oo loo baahanyahay in aad ku qorto lambarka telefoonka ee moobiilkaaga iyo cinwaanka

Isku xidhiidhi ama isku xidh kulanka adiga oo adeegsanaya telefoonka gacanta (mobil) ama Ipad



Sidan baad sameyn doontaa haddii aad isticmaaleyso telefoonka gacanta (mobil) ama Ipad.


Guji ama riix linkiga ku qoran fariinta qoraalka ee laguug soo direy (sms) ama e-meylka. Guji ama riix "Gå till besök" ee kaaga soo muuqanaya app-ka.

Waxaa sidoo kale aad furi kartaa app-ka "Mitt Vårdmöte-VGR" isla markaana waxaa aad ka heli kartaa kulanka (mötete) adiga oo dooranaya rugta maraa ka dib riix ama guji "Mina ärenden".




U gal adiga oo raacaya tilmaamaha ku qoran app-ka.


Waxaa mararka qaarkood dhici karta in aad u baahto Mobil BankID. Waxaa dhici karta in aad mararka qaarkood isticmaasho kood laguugu soo direy sms ahaan ama in aad ku qorto magacaaga



Waxaa dhici karta in aad marka hore ansixiso shuruudaha si aad hore ugu sii socoto.



Waxaa dhici karta in loo baahdo in aad furto kamarada iyo makarafoonka ka hor inta uusan kulanku bilaaban.



Waxaa hadda gali doontaa qolka sugitaanka, halkaas oo aad ku sugi doonto ilaa inta uu kulanku ka bilaabanayo.

Marka la joogo wakhtigii kulanku bilaaban lahaa waxaa aad shaashada ka arki doonta boton (knapp) lagu magacaabo Bilow kulanka "Starta besök".

Fadlin riix ama guji kaas si uu kulanku u bilowdo.

Marka aad ka galeyso kulanka kombiyuuterka




Sidan halkan ku xusan waa in aad sameyso haddii aad rabto in aad isticmaasho kombiyuuterka.

Waxaa aad u baahantahay biraawsarka Google Chrome ama Mozilla Firefox.

Ka soo dajiso bir Chrome: www.google.com/chrome

Ka soo dejiso Firefox: www.mozilla.org/sv-SE/firefox/new



Booqo bogga internetka ee Mitt vardmöte:

<https://mittvardmote.vgregion.se/mittvardmote>



Dooro qaybta aad ka tirsantahay.

Markaa ka dib Guji "Mina Ärenden"/"kiiskeyga"



Fadlan gal adiga oo adeegsanay BankID ama Mobil BankID.



Guji "Gå till besök"/"Tag Booqasho". Badhanku wuxuu bilaabayaa in uu shaqeeyo 15 daqiiqo ka hor kulanka.

Kulanku waxaa uu bilaaban doona marka labadiinabu adiga iyo shaqaalaha aad lahadli doonto aad soo gashaan.


Waxaa haboon in la ogaado waxa uu kulanku ku saabsanyahay




Hawl wadeenadka aad kula hadleyso aaladaha la isku arko waxaa saaran waajib la mid ah kan kulanada caadiga ah in uu qariyo sirta shaqsiga.



Hawl wadeenada aad hadli doonto waxaa ay kaa soo wici doonaan telefoonkaaga gacan (moilkaaga), haddii kulanka aalada la isku arko uu sidii la rabey u shaqeyn waayo.



Qiimha lacagta ee kulanaka la adeegsado aaladaha la isku arko iyo kulanada kale ee caadiga ah waa mid isku mid ah. Kulanada dhalinyarada ay da'doodu ka yartahay 19 sanno iyo carruurta waa mid bilaa lacag ah, sidoo kale kulanada shaqsiyaadka ay da'doodu ka weyntahay 85 sanno waa mid bilaa lacag ah. Dadka ay da'doodu u dhaxeeyo 19 sanno iyo 85 sanno waxaa loo soo diri doonaa fakturo kulanka ka dib. Haddii aad haysato kaadhka bilaa lacagta la isku daweeyo (frikort), waa mid xitaa khuuseeya kulanada la adeegsado aaladaha la isku arki.



Haddii aana ka qayb qaadan doonin kulanka waa in aad na soo wargaliso 24 saacadood ka hor wakhtiga kulanka. Markaas haddii aad sidaas sameeyso uma baahnid in aad wax lacag ah bixiso.

Laakiin haddii aanad na soo wargalin wakhtigii loogu talogaley waa in aad bixisaa lacag. Arinkani waxaa uu khuseeyaa carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn intaba. Waxaa aan soo diri doonaa fakturo.



Fadlan la xidhih qofkii kuu soo direy warqada wicista haddii aad qabto wax su'aalo ah.